

Hagaha sida qashinka la isaga qubo



Janaayo 2024

Somali




Gogoldhig

Hagahani wuxuu deganayaasha siinaya dulmar ku saabsan ikhtiyaarada qashin-qubida.

Tusmada

Dad ku deeqidda iyo hagaajinta	3
Dib u warshadaynta	4
Dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah	6
Daarad ku burburinta qashinka	7
Qashinka daaradda.....	7
Qashinka khatarta leh ee guryaha	8
Qubidda daawooyinka	10
Qubidda cirbadaha iyo waxlaha afka badan ee guryaha.....	10
Goobaha qashinka la geeyo iyo isu imaatinka qashin uruurinta ..	12



Jawaabo u hel su'aalahaaga dhanka dib u warshadaynta iyo qashin qubidda

Hel habka ugu fiican ee dib u warshadaynta, dib-u-isticmaalida, ama alaab ka saarida gurigaada adigoo:

- Booqanaya hennepin.us/greendisposalguide
- Wacaya 612-348-3777
- limayl ku diraya environment@hennepin.us



Dad ku deeqida iyo hagaajinta

Dadka ku deeq alaabaha la isticmaali karo

Ku deeqidda alaabaha la isticmaali karo hay'adaha samafalka waa hab fiican oo lagu caawin karo bulshadaada laguna yareyn karo qashinka. Raac tilmaamahan ka hor intaadan ku deeqin:

- La xiriiir hay'adaha ka hor inta aanad ku deeqin si aad u ogaato waxa ay aqbalaan iyo maalmaha iyo saacadaha ay qaataan deeqaha.
- Dadka ku deeq alaabaha xaaladdoodu wanaagsan tahay. Hubi in ay dhaqan yihiin ama la nadiifiyay, shaqaynayaan, iyo inay ammaan tahay isticmaalkooda.
- Waxaa fiican in alaabo-xilliyeedka aad dadka ku deeqdo wax yar ka hor xilliga la isticmaali doono, sida inaad dadka ku deeqdo dharka barafka xilliga dayrta iyo qalabka golf-ka isna xilliga gu'ga.




Eeg buug-yaraha fursadaha deeq-bixinta si aad u hesho liiska hay'adaha maxaliga ah ee qaata deeqaha hennepin.us/-/media/hennepinus/business/work-with-hennepin-county/environmental-literature/donation-opportunities-brochure.pdf

Hagaaji sidoo kalena dayactir



Ka hel caawimo iyo hagitaan bilaash ah tabaruceyaasha ku sugan Rugta Qalab-hagaajinta ee Hennepin County si ay kugu hagaajiyaan qalabka guriyaha ee jjabay, dharka, elektiroonigga iyo kuwa kaloo badan. Wax badan kala soco barta hennepin.us/fixitclinic kana arag jadwalka maalmaha qalab-hagaajinta ee socda.

Dib u isticmaal sidoo kalena dib u warshadee agabyada dhismaha



Laga bilaabo qalabka nalalka iyo saabaanta guryaha ilaa agabka sagxadaha iyo alwaaxyada dhismaha, agabyada dhismaha badankood dib baa loo isticmaali karaa. Hennepin County waxay bixisaa deeqo si dib loogu warshadeeyo ama dib loogu isticmaalo agabyada xiliyada mashaariicda dib u habeynta guryaha. Wax badan kala soco barta hennepin.us/salvage

Dib u warshadaynta

Dib u warshadaynta waa tallaabo sahlan oo aad qaadi karto si aad u taageerto bulshadaada una u ilaaliso deegaanka. Dib u warshadaynta waxay abuurtaa shaqooyin waxayna yaraysaa cadadka khayraadka dabiiciga ah ee loo baahan yahay si loo sameeyo agab cusub.

Agabyadaa aad dib ugu warshadayn karto guriga waxa ka mid ah:

Warqadaha, kartoonaada, bokisyada

Kala fidi Kartoonnada



Maya: Istiraashooyinka, tiishka gacmaha, warqadaha jarjaran, saxamaha warqada ka sameysan, weelasha jalaatada, koobabka kafeega

Dhalooyinka balaastiga ah, caagadaha, koobabka, weelasha

Dib u warshadee balaastiga # 1, 2, 5 Furkooda u daa



Maya: Bacaha ama xaashiyaha balaastiga ah, baqshadaha wax lagu qaado, #6 balaastig, Styrofoam™, weelasha lagu keeno walxaha halista ah

Dhalooyinka iyo qarshooyinka qaruurada ah



Maya: Galaasyada cabitaanka, alaabta pyrex-ka ah, kuwa carrada ka sameysan, muraayadaha

Gasacadaha birta ah



Maya: Daasadaha rinjiga, dhululubada propane-ka, haanta helium-ta, weelasha lagu keeno walxaha halista ah

kartoonnada

Ha kala fidinin



Maya: Kartoonnada ukunta ee ka sameysan warqada ama Styrofoam™ ka, weelasha jalaatada

Tilmaamaha diyaarinta

- Xoogaa biyo ka raaci alaabta ka hor inta aanad dib u warshadayn.
- Alaabta ku rid baaldiga ama welka qashinka iyagoon waxba lagu duubin.
- Ha burburin gasacadaha, dhalooyinka balaastiga ah ama kartoonaada. Kala fidi Kartoonnada.
- Furarkooda ha saarnaadaan dhalooyinka balaastiga ah, caagagga, iyo weelasha.

Alaabtaan ka ilaali waxa aad dib u warshadeyneyso

Alaabtaan soo socota waxay dhibaato u keenaan habka dib-u-warshadaynta sababtoo ah waxay ku marmaan qalabka, waxay dhaawici karaan shaqaalaha, mana lahan suuq wanaagsan oo u beddelo agab cusub. Ka ilaali alaabta aad dib u warshadeyneyso. Wax badan kala soco barta hennepin.us/recycling



Bacaha iyo xaashiyaha balaastiga ah



Alaabta dib u warshadeynta ee baceysan



Alaabta waaweyn ee balaastiga ah iyo qalabka caruurta ku ciyaarto



Weelashada balaastiga ah (Styrofoam™)



Alaabta elektrooniga ah iyo baytariyada



Alaabo bir ah oo kala duduwan




Suxuunta dhalada ah, dhalooyinka daaqaadaha, iyo kuwa carrada ka sameysan



#6 iyo balaastibga madow



saxamaha warqada ka sameysan, koobabka, istiraashooyinka, dhuumaha, iyo maacuunta



Walxaha wax ku marma sida xarkaha korontada, fiilooyinka nalalka iyo tuubooyinka



Dhululubada gaaska (propane, helium, CO2)



Weelasha lagu keeno walxaha halista ah

Dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah

Hadii dib loo warshadeeyo walxaha organic-ga ah, waxaa cuntadaada, baakaadaha cuntada, iyo alaabta ciidu burburiso loo rogi karaa qashin qiimo leh oo loo isticmaalo qurxinta dhulka iyo mashaariicda dhismaha waddooyinka.

Ka raadi ikhtiyaarada goobaha qashinka orgaaniga laga qaado iyo kuwa la geeyo barta hennepin.us/organics

Dhammaan cuntooyinka



Baakaadaha cuntadu gaartay



Maya: Kartoonnada cuntada barafeysan, bacaha qaloonka, bacaha cuntada fudud lagu qaato, weelasha jalaatada, tiishka gacmaha ee kiimikada wax nadiifinta la mariyay

Alaabta ciidu burburiso ee la caddeeyay



Ka raadi summada BPI-da alaabta la caddeeyay.

Maya: Weelasha cuntada ee aan lahayn summada BPI-da, ka eeg websaydka BPI-da bpiworld.org si aad u xaqiijiso in sheygu yahay midka ciidu burburiso

Alaabta kale ee ciidu burburiso



Maya: Qashinka daaradda, xafaayadaha ama suufka caadada, qashinka rabaayadaha iyo xoolaha, weelka ama gogosha rabaayadaha, suufka nadiifinta ama qallajinta ilmaha, calalka ama dufta ku harta dhar qallajiyaha, alaabta dib loo warshadayn karo (boksiyada, kartoonnada)

Daarad ku burburinta qashinka

Haddii weelka qashin burburinta uu yaalo daaradda, waxaad haraaga miraha iyo khudrada, caleemaha, iyo cawska u rogi kartaa qashin nafaqo hodan ku ah oo loo isticmaali karo geedaha iyo beerta gurigaada.

Walxaha aad ku ridi karto weelka qashin burburinta waxaa ka mid ah:



- Haraaga khudrada iyo miraha
- Laamanka dhirta laga jaro
- Cawska iyo caleemaha
- Gufarka iyo shaandhaha kafeega
- Qolfaha ukunta
- Qolfaha lowska



Ka raadi tilmaamaha habka qashin burburinta barta hennepin.us/composting

Qashinka daaradda



Qashinka daaradda, sida cawska la jaray, caleemaha, iyo laamaha, waa kheyraad qiimo leh oo nafaqo dib ugu soo celin kara daaradaada ama lagu burburin karo welka qashin burburinta. Waa mamnuuc in qashinka noocaan ah lagu rido weelka qashinka guryaha.

Ikhtiyaarada iyo talooyinka maaraynta qashinka daaradda:

- Ku rid weelka qashin burburinta ee daaradda.
- Eeg in qolyaha qashinka qaada ay leeyihiin weelasha qashinka ee wadada geeskeeda la dhigo.
- Gee qashinka daaradda goobaha qashinka la geeyo.
- Cawska la jaray iyo caleenta daadatay ku dhaaf bedkaaga. Caleenta geedaha haku qubin waddada.
- Qaad qashinka xayawaanka rabbaayada kuna rid weelka qashinka.

Ka raadi liiska goobaha la geeyo qashinka daaradda barta hennepin.us/yardwaste.

Qashinka khatarta leh ee guryaha

Gee goobaha qashinka la geeyo



Alaabooyinka qaar ee aan ku haysano guryaheena waxaa ku jira walxo halis ah oo wax u dhimi kara caafimaadkeena ama deegaanka haddii aan si badbaado leh loo qubin.

Alaabta soo socota waa alaab laga aqbalo goobaha qashinka la geeyo ee Hennepin County (jaldiga dambe ka eeg macluumaadka). Ka baro qaababka kale ee qashin qubidda ee aan bey'adda wax u

dhimin barta hennepin.us/green-disposal-guide

Qalabka baabuurta

- Oolyada baraf-noqoshada ka hortagta
- Saliida bareegga iyo dab-gudbinta gaariga
- Shidaalka iyo saliidda
- Batariyada aashitada iyo rasaasta leh



Alaabooyinka guryaha, barxadaha, iyo beerta

- Batariyada
- Alaabta wax nadiifinta
- Dhuumo-nadiifiyaha
- Guluubyada nalalka fluorescent-ka
- Rinjiga, oolyada alwaaxda, iyo khafifiyaasha
- Sunta cayayaanka
- Heerkul-maareeyaasha iyo heerkulbeegyada leh meerkuriga



Alaabooyinka qofka isku daryeela

- Carfisada timaha
- Ciddiyo rinji ka saaraha
- Barafuunnada

Qalabyada elektrooniga ah

- Kaamaradaha
- Rikoorada DVD-yada
- Kombiyuutarada
- Qalabka ciyaaraha fidiyowga ah
- Mashinada wax lagu daabaco
- Telefoonnada
- Telefshinnada
- Raadiyaha iyo qalabyada muusiga
- Codbaahiyaasha



Qalabka korontada ku shaqeeya

- Mukeefyada
- Qalabka cunto-kulaynta
- Foornooyinka
- Talaagadaha
- Mashinada dhar dhaqida iyo qallajinta
- Biyo kuleyliyaasha



Alaabooyin kale

- Taayarada
- Joodariyaal iyo biraha sariiraha



Khidmadaha

Alaabta qaar khidmado ayaa laga qaadaa, waxaana ka mid ah:



- Qalabka korontada ku shaqeeya: \$15 midkiiba
- Joodariyaal iyo biraha sariiraha: \$25 midkiiba (kaliya ayaa laga aqbalay goobta Brooklyn Park)
- Taayarada: \$3 midkiiba
- TV-yada, shaashadaha kumbuyuutarka iyo laptop-yada: \$10 midkiiba

Qubidda daawooyinka



Gee daawooyinka aan la rabin ama aan la isticmaalin sanaadiiqda lagu rido dawooyinka sifa si badbaado leh loo qubo.

Dhammaan noocyada dawooyinka laga keeno xaafadaha waa la aqbalaa, oo ku jiraan dawooyinka dhakhtarku qoro, dawooyinka farmashiyaha laga iibsado, fiitamiinnada, kaabayaasha, iyo dawooyinka xayawaannada rabaayada.

Wax badan kala soco barta [hennepin.us/medicine](https://www.hennepin.us/medicine) kana raadso goobaha sanaadiiqda lagu rido dawooyinka

Qubidda cirbadaha iyo waxlaha afka badan ee guryaha



Walxaha afka badan waxaa ka mid ah irbadaha caadiga, irbadaha macaanka, irbadaha faleembada, kuwa qalimaha ah, kuwa dhiig soo saarida, iyo saliingooyinka. Weligaa haku ridin weel ay ku jiraan irbado la isticmaalay ama walxaha afka badan weelka qashinka dib u warshadeynta.

Ikhtiyaarada xagga qubida cirbadaha iyo walxaha afka badan waxaa ka mid ah:

- Hubi in daryeel-bixiyahaada caafimaadka uu leeyahay barnaamijka qashin aruurinta.
- Guriga ku burburi. Raadso qalab iyo weelal loo adeegsan karo in cirbadaha iyo walxaha afka badan lagu qalloociyo, lagu jejebiyo, lagu gubo gebi ahaamba, ama lagu jarjaro.
- Istacmaal barnaamijyada qashin qaadista ee boostada la marsiyo sida kuwa ay bixiyaan shirkadaha Stericycle, Inc., Sharps, Inc., GRP Medical Services, or MedPro Disposal.
- Gee goobaha qashinka la geeyo ee Hennepin County. Cirbadaha iyo walxaha afka badan waxaad ku kaydisaa weel balaastig ah oo adag oo cirbaduna karin oo leh dabool dhuuqsan, ka dibna ku qor "Do not recycle: Household sharps". HA ISTICMAALIN weel dhalo ah.



Wixii macluumaad dheeraad ah ka hel barta [hennepin.us/green-disposal-guide/items/needles-sharps](https://www.hennepin.us/green-disposal-guide/items/needles-sharps)

Yaree qashinka khatarta leh

Baro sida loo akhriyo istiikarada digniinta

Akhrinta digniinada ku qoran alaabta guryaha waxay kuu sheegi karaan sida alaabtu ay khatar u leedahay. Raadi erayada digniinada ee ku qoran istiikarada ka dibna dooro sheyga ugu khatarta yar.

Khatar yar leh



Khatar badan leh

Erayga digniinta	Heerka khatarta
Taxaddar	Khatar fudud/dhexdhexaad ah
Digniin	Khatar dhexdhexaad ah
Khatar	Si fudud dabka u qabsan kara, daxalaysa ama aad u sun ah
Sun	Aad u sun ah

Si nabdoon u kaydi alaabta

- Ku kaydi alaabta weelashoodii asalka ahaa, hubi in dhammaan daboolada iyo furarka ay si adag u saaran yihiin.
- Saar alaabta meel meel carruurta iyo xayawaanadu aanay gaarin.
- Waligaa kiimikooyin ha isku darin (sida warankilada iyo ammooniya).

Gurigaaga ka yaree kiimikooyinka khatarta leh

- Yaree iibsashada alaabta guryaha ee khatarta leh adigoo isticmaalaya nadiifiyaasha kulli-shuqulka ah ama adigoo baranaya sida loo sameeyeyo nadiifiyaal adiga aad leedahay.
- Kabaha iska bixi marka gurigaaga soo galeyso si kiimikooyinka bannaanka ka soo raacay aadan guriga ula soo galin.
- Isticmaal walxaha lagu shubo haanta buufinta halkii aad aerosol ka isticmaali lahayd maadaama sunta aerosol-tu ay si fudud kugu tegi karto.
- Ka fogow carfisooyinka guryaha iyo shumacyada ee kiimakada leh.
- Ka fogow kiimikooyinka loo isticmaalo dhar nadiifinta qallalan.
- Ka fogow sunta cayayaanka iyo tan beeraha ee kiimikada leh.



Goobaha qashinka la geeyo ee Hennepin County

Waxa lala imaanayo

- Caddaynta degenaanshaha, sida laysinka darawalnimada ama biilalka tamarta
- Lacag-bixinta, haddii ay jirto- lacag caddaan ah, jeeg, kaarka dhebidka ama kan kiridhitka

Sugidda amniga qofka

- Ku jir gaarigaaga in shaqaaluhu si kale kugu amraan mooyee
- Ku kaydi alaabta buudka gaariga, sariirta taraagga ama isjiidka. Shaqaalaha ayaa meesha ka saari doon alaabta.

Wixii ku saabsan macluumaadkii ugu dambeeyay ee goobaha tag hennepin.us/dropoffs ama wac 612-348-3777.



Brooklyn Park

8100 Jefferson Highway
Brooklyn Park, 55445



Bloomington

1400 West 96th Street
Bloomington, 55431

Isu imaatinka uruurinta qashinka khatarta leh

Isu imaatinka qashin aruurinta waxay sahleysaa in dadku helaan goobo deegaanka ah oo qashinka khatarta leh lagu qubo. Jadwallada iyo liiska alaabta la aqbalo ka hel barta hennepin.us/collectionevents

Hennepin County

Environment and Energy (Bey'adda iyo Tamarta)

hennepin.us/greendisposalguide

environment@hennepin.us

612-348-3777

34-104-0450-24 Somali

